**XEERKA MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA 9 Disember 1952 L. 2359**

**Xeerka shaqaalaha Dawladda Talyaaniga ee ka hawlgala Maamulka Wasaayadda Soomaaliya ee Talyaaniga (A.F.I.S.)**

## MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Marka uu arkay faqradda koobad, qod. 77, iyo faqradda shanaad 87 ee Dastuurka;
Marka uu arkay xeerka 1 Nofember 1951, lr.1301;
Isagoo qaddarinaya awoodda wakaaaladda lagu siiyay warqadda xeerka la soo sheegay;
Marka uu dhagaystay talada Hanitodhowraha Guud Kulankooda buuxa;;
Marka uu dhagaystay talada Golaha Wasiirada;
ee la xariirta tala soo jeedinta Wasiirka Koobaad, Wasiirka arrimaha dibadda, soo bandhigidda Wasiirda Garsoorka iyo diffaaca iyo miisaaniyadda ku-meelgaarka ee khasnadda;

## WUXUU XEER KU SOO SAARAYAA

### Qod. 1

Shaqaalaha Dawladda waxaa loo adeegsan karaa hawlagalka Maamulka Wasaayadda Soomaaliya ee Talyaaniga, marka uu soo weydiisto Wasiirka arrimha dibadda.

Wasiirka arrimaha dibadda ayaa si toosa u xilsaaran shaqaalaha soomalida hawlgalintooda.

Dhammaan shaqaalaha kale waxaa loo qoondeynayaa xilalka madaxda ee ay diyaarisay Wasaaradda arrimaha dibadda, iyadoo lagu soo saarayo qaraar ka soo baxa Maamulka isla shaqalahasu ka tirsanyahay, marka la horkeeno Wasiirka arrimaha dibadda iyo midka Khasnadda.

Hantidhowraha Guud waxaa lagu magacaabayaa xeer uu soo saaro Guddoomiyaha Golaha Wasiirada marka u soo jeediyo Wasiirka arrimaha dibadda xilkaaso ah Guddoomiyha Maxkamadda xisaabaadka.

Madaxa Xisaabiyaha Guud waxaa laga soo xulayaa saraakiisha ka tirsan Xisabaadka Guud ee Dawladda.

### Qod. 2

Xaquuqda lacageed e leh qaabka joogtada ama mid socota ee u sugnaatay shaqaalaha rayidka ee lagu sheegay qod. sare waxay ka sii mid noqonayaan Maamulka. Wixii la xariira askarta, waxaa lagu habeeynaya, isla fahamka Wasiirka arrimaha dibadda, diffaca iyo khasnadda dekereto wasiirada ka dhexeysa. Gunnada heerka maciishadda waxaa lagu saleeynayaa 100% iyado lacagta lagu soo sheegay qod. 6 ee Dekereetada Madaxweynaha Jamhuuridda 11 Setember 1951, waxaana lagu bixinayaa heerka u degsan xarunta Roma. Iqtisaaska kale ee kolba u sugnaada si waafaqsan Xeerka Talyaaniga, waxaa laga bixinayaa miisaniyadda Maamulka Somaaliya isla heerkaas iyado loo hoggaansamyo isla xeekaas.

### Qod. 3

Marka la eego shaqaalaha madaniga iyo kuwa askarta ee Soomaaliya, Maamuluhu wuxuu ku leeyahay awoodda anashax-marin ee agaasimayaasha guud mid walba u sugnatay iyo taliyeyaasha dhulka ee Ciidamada qalabka sida, ama darajooyinka u dhigma.

### Qod. 4

Shaqaalaha waxaa u sugnaaday fasaxa caadiga ee saddex-sanadlaha oo ah 180 cisho, waxaana u sii dheer 20 cisho ee safarka. Waqtiga fasaxa caadiga lagu qaato waxaa loo xisaabinayaa sidii isagoo shaqada ku jiro.

Fasaxa caadiga waxaa si ku-meelgaara dib loogu dhigi karaa haddii shaqada loo baahdo, sidoo kale waxaa la siin karaa xaafiis ahaan fasaxa, marka saddex-sanadlaha la gaaro.

**Qod. 5**

Maamuluhu wuxuu bixin karaa marka ay jiraan sababa gaara ee culus ama caafimmad, fasaxyo caadi ah ee la soo hormariyay oo goo'goan iyo, ay ku jiraan fasaxii caadiga, fasaxyo aan caadi ahayn oo aan ka badnayn shan iyo toban cisho sanad kasta oo la shaqeeyo.

**Qod. 6**

Askarta darajooyinka leh  fasxa saddex-sanadlaha waxaa la siinayaa 120 cisho.

**Qod. 7**

Fasaxyada Maamulaha waxaa soo oggolanaya Wasiirka arriimaha dibadda waana laba bilood sanadkii iyadoo ay uu dheertahau maalmaha safarka.

**Qod. 8**

Gunnada lagu qaadanayo shaqada Soomaliya iyo gunnooyinka kale ee gaarka aha ee Dalka, waxaa bixinaya Maamulka Soomaaliya. Kuwaasna waxaa lagu goynayaa Xeeryin Maamulaha ay horay u soo oggolaadeen  Wasiirada arrimaha dibadda iyo Khasnadda.

**Qod. 9**

Dhaqaalaha la siinayo Mamulaha iyo Xoghayaha Guud waxaa lagu soo saarayaa **xeer** Wasiirka Arrimaha Dibadda ka dib marka uu arko soo bandhigidda  Wasiirka khasnadda, sida ku cad qaababka uu tilmaamayo Xeerka 4 Jannaayo 1951, kaaso mid kasta uu u dhigmo kuwa ay qaataan safiirada iyo Wakiilada Farriimaha Dibadda qaada.

Maamulaha iyo Xoghayhaha Guud waxay sii haysanayaan dhaqalahaas xitaa marka ay fasaxa yihiin ama Dalka Soomaaliya shaqa awgeed uga maqanyihiin,

**Qod. 10**

Gunnada lagu qaadanayo hawlgalka Soomaaliya ee lagusoo sheegay qod. 8, waxay bilaabanaysaa maalinta Dalka Soomaliya loo soo dhoofo, waxayna istaagaysaa maalinta Dalka Talyaaniga dib loogu soo laabto.

**Qod. 11**

Shaqaalaha Soomaaliya ka shaqeeya, ama kuwa dalka lagu soo celiyay, xaq waxy ku leeyihiin miisaaniyadda Maamulka, iyaga iyo dadka qoysaskooda ka mida:

a) in loo celiyo kharashka safarka; ha ahaado tareen, gaari-bas, xagga badda ama circa, oo ay ku jiraan kharashka cuntada labadan xaaladood ee dambe;

b) in loo celiyo kharashka sida buuxda uga baxay gaadiidka la adeegsaday sidoo kale shandaha iyo alaaabada guriga, tira aan ka badnayn saddex kiintaal qof kasta iyo sikastaba gebi ahaan aan ka bandyan 20 kiintaal;

c) dhaqaalaha hawlaha safarka waxaa la siinaya qofka iyo xubnaha xaaskiisa

muddada ay ku jiraan safarka dhulka qaranka keliye. Wixii ku saabsan dabaqidda uu shaqaalahu xaq u leeyahay in uu ku safro, waxaa la dabaqayaa xeerka u dadkasan Talyaaniga. Wixii la xariira safaradda markabka, shaqaalaha darajada kasta A iyo B iyo shaqaalaha darajadoodu aanay ka hoosayn darajada 10 ee Kooxda C waxay xaq u leeyihiin dabaqadda koobaad. Dabaqadda soo hartay ee kooxda C iyo wixii la mida iyo saraakiil ku xigeenada waxay xaq u leeyihiin dabaqadda labaad ama midka dalxiiska. Shaqaalaha qaybaha hoose waxay xaq u leeyihiin dabaqadda saddeexaad ee gaarka.

Wixii ku saabsan safarrada circa, waxaa loo celinayaa kharsh la tartami kara illaa midka safarka markabka. Waxyaabaha la xariira soo celinta kharashka iyo bixinta gunnooyinka lagu sheegay faqradda kore waxaa la raacayaa qaabka iyo shuruudaha uu sheegayo Xeerka Talyaaniga. Qoysaska shaqaalaha Ciidanka Badda ee saaran maraakiibta xeebaha Soomaaliya jooga, ee doonaya in ay u wareegaan meel aan la xubin ee dalka Talyaaniga, waxaa lagu dabbaqayaa xeerka dekereetada 3 Juun 1938, lamba. 850, iyo wax ka baddalka ka dambeeyay, oo aan xadka lahayn sida ku qoran faqradda saddexaad ee dekereetada la soo sheegay.

**Qod. 12**

Shaqaalaha fasaxa caadiga qaadanaya iyaga iyo xubnaha qoyskooda waxay xaq u leeyihiin in loo celiyo kharashka safarka ay ku galeen inta u dhaxeysa deegaankooda Soomaaliya illlaa goobta ay dalka Talyaaniga uga dhoofayaan, iyo sidoo kale arrintaas cagsigeeda, iyadoo loo hoggansamayo arrimaha ku xusan faqrdaha 2. 3. 4 ee qodobka Sare.

Haddii loo oggolado in fasaxa loo jarjaro sida uu qabo qod. 5, kharashka safarka waxaa la siinaya hal mar midksta oo ka mida muddada loo cayimay ee fasaxa caadiga. Sidaaso kale xaaladahaas waxaa la xisaabinayaa halmar maalmaha safarka marka la goynayo muddada idil ee fasaxa.

Inta lagu jiro fasaxa caadiga shaqaaluhu wuxuu ka faaidaysanayaa lacagaha iyo gunnada uu shaqada Soomaliya ka hayaya, ee lagu soo sheegay qod. 8, wuuuna sii haysanyaa gunnadaas inta uu ka dhammaanayo fasaxa sahaqada Talyaniga dib loogu soo laabanayo ama ay shaqadu ka joogsanayso.  Mararka ay jirto baahi shaqo oo Maamuluhu garaowsadao in shaqaalahu aanu ka faaidaysan karin fasaxa caadiga ee la xariira saddex-sanadalaha, waxaa loo oggolyahay in fasxa uu aruuro kuna biiro fasaxa u bislaaday saddex-sanadlaha soo socda. Fasaxaas ururay waa in uu ku koobnaadaa muddo aan ka badnayn laba saddex-sanadle.

**Qod. 13**

Inta lagu jiro fasaxa aan caadiga ahayn ee lagu xusay qod. 5, haddii loo siiyay sababa la xariira caafimaadka qofka, wuxuu sii haysanayaa gunnada uu ku mutaystay shaqada Soomaaliya si la mida fasaxii caadiga ahaa.

**Qod. 14**

Marka ay jirto xaaladda sugitaanka shaqada (aspettativa) ee la xariirta jirro ay sababtay shaqada uu Soomaaliya ka hayay, ka sakow dhaqalaha uu ku helaya xeerka Talyaaniga, shaqaaluhu wuxuu xaq u leeyahay xitaa gunnada shaqada Soomaaliya ee lagu xusay qod. 8, oo hoos loo dhigay isla xeerka u dagsan mushaarka.

**Qod. 15**

Maamulka Soomaliya ayaa bixinaya kharashka baxnaada iyo daawaynta shaqalaha inta uu ku  jiro xarumaha caafimaaadka, dhaawacyada, waxyeellada, qarracnka ama jirrooyika ay keenaan shaqada ama  sababa shaqada ay uga sii dareen xaddigga shaqada ha ahaato cimilada.

**Qod. 16**

Shaqaalaha loo diro dalka Talyaaniga sababa ah in uu ku soo qaato daaweynta lagu sheegay qod. sare, inta uu baxnnanada ku jiro waxaa loo tixgalinayaa sidii isagoo ku jira fasax aan caadi ahayn ugu badnaan sagaashan cisho.

**Qod. 17**

Shaqaalaha u xilsaaran hawl gaara in ay ka qabtaan Soomaaliya waxay xaq u leeyihiin in loo celiyo kharashka iyo gunnada safarka muddada ku xusan qodobada la soo sheegay iyo dhaqaalaha hawsha gaarka tira laba jibbaar marka loo eego midda u degsan darajada la mida ee Talyaaniga. Dhaqaalahaas waxaa hoos loo dhigayaa affar meelood saddex meel ka dib 90 cisho iyo kala bar ka dib 180 cisho.

Wixii ku saabsan hawlaha Soomaaliya ee lagu qabanayo Talyaaniga, oo ay tahay in uu soo oggolaado Wasiirka arrimaha dibadda, dhaqaalaha hwlahaas loo qoondeyay ee lagu qabanayo Talyaaniga waxaa la siin karaa muddo aan ka badnayn cisho.

**Qod. 18**

Lacagaha laga bixinayo miisaaniyaadda Maamulka Soomaaliya ee la siinayo dhammaan shaqaalaha waxa la marsiinayaa qaabka lacag-jarista cinwaan kasta uu leeyahya ee laga sameeyo Talyaaniga.

Wixii ka soo baxa, marka laga saaro lacagaha loo gooyo khasnadda ama wakaalado kale ee hawlgabka ama cinwan kale oo si gaara looga fikiray waxaa lagu shubayaa miisaaniyadda Soomaaliya.

Lacagaha laga bixinayo miisaaniyadda Maamulka Soomaaliya laguma dabbbaqi karo lacag-jaris ka sarreysa midka dalka Talyaaniga.

**Qod. 19**

Hawlgalka laga qabto Soomaaliya wxaa ka ratimaya waxtarrada ku xusan qod 68 Xeerka Hawlgabka ee lagu meelmariyay dekereetada 1895, lamba. 70, qod. 5 ee dekereetada 21 Nofember 1923, lr.2480, iyo qod. 5, 6 ee dekereetada 18 disember 1922, lamba. 1637, iyo wax ka baddaladii ka dambeeyay.

**Qod. 20**

Garsoorayaasha Talyaniga ee ka hawlgala Soomaliya ee haya xilkooda Garsoor ama kan eddaynta, lama soo dhoofin karo ka hor ugu yaraan iyagoo aanay u dhammaan saddex sano.

**Qod. 21**

Culaysyada ay keento dabbaqidda dekereetadaan, waa la xilqaadayaa, marka laga reebo lacagaha ku xusan faqradda koobaad qod. 2, ee lacagaha lagu kabay miisaaniyadda Maamulkas Soomaaliya.

**Qod. 22**

Dekereetadaan waxay dhaqangalaysaa 1 Jannaayo 1953.

Arrimaha ku qoran qod. 19 waxay dhaqangalayaan 1 Abril 1950.

Dhaqaalaha u sugnaaday shaqaalaha dawladda ee ka shaqeeynaya Soomaaliya illaa 31 Disember 1952, waxaa loo gooynaya wax aan ka badnyan midka lagu sheegay dekereetada Maamulaha ee ay soo oggoladeen Wasiirada arrimaha dibadda iyo Khasanadda.

Dekereetadan oo wadata shaabbadda Dawladda waxaa lagu daraya Uruurinta rasmiga ee xeerarka iyo Xeeroyinka Jamhuuriyadda Talyaaniga, iyado cid walib ay waajib ku tahay in ay raacdo una hoggaansanto.

Tariikhda: Roma, 9 Disember.

**EINAUDI**

**De Gasperi — Zolli —Pacciardi — Pella**

Waan arakay: Shaabbad hayaha **— Zolli**

Laga diiwaangeliyay Hantidhowrka Guud 20 Disember

Warqadaha Xukuumada, diiwaanka lamba. 64, warqadda lamba. 36 **— Palla**